



Burlövs
kommun

SOMALISKA

Ku soo dhowow dugsiga xannaanada iyo barbaarinta ee Iswiidhan!

Dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta waxaa loogu talagalay carruurta u dhexaysa 1 - 5 sano. Wuxuuna diiradda saaraa daryeelka, horumarka iyo abaabinta.

Maxay xannaanada carruurta ugu fiican tahay ilmahaaga?

Waxaa jira taageero ballaaran oo cilmi baaris ah oo loogu talagalay dugsiga xannaanada oo leh saameyn togan oo xagga horumarka iyo tarbiyenta carruurta ah. Carruurta dhigata dugsiga xannaanada waxay leeyihiin awoodda waxqabadka oo afka iswiidhishka ah oo wanaagsan, waxayna ku guuleystaan natiijooyin sare xagga aqoonta ee dugsiga, waxayna kaloo ku guuleystaan si ka fiican noloshu carruurta aan ka qaybqaadan waxqabadka dugsiga barbaarinta.

Habka horumarinta luqadda barbaarinta waa mid muhiim u ah carruurta oo dhan, laakiin wuxuu muhiim u sii yahay carruurta leh af hooyo kale oo aan ahayn iswidhishka. Qaar ka mid ah carruurta ku koray laba luqadood ama in ka badan, dugsiga xannaanada ayaa ah meesha keliya ee ilmuhu fursad ugu helo barashada iswidhishka.

Qeyb muhiim ah oo ka mid ah shaqada dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta ayaa sidoo kale ah in lagu taageero awoodaha waxqabad ee carruurta si ay ula kulmaan, u jaangooyaan oo u muujiyaan shucuurta, u sameystaan xiriiri dhow oo aamin ah una sahamiyaan hareerahooda.






Burlövs
kommun



Dokumentiyada maamulka iyo hawgalka ku dhisan habka dimoqaraadiyadda

Dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta waxaa xukuma manhajka waxbarashada ee dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta, (Lpfö18) iyo sharciga waxbarashada (2010: 800) oo uu go'aamiyay baarlamaanka dalkan Iswidhin oo ah siyaasiyiintooda la soo doortay. Dhammaan shaqooyinka dugsiga xannaanada waxay ku tiirsan yihiin sharciyada bulshada ee Iswiidhan, qiyamka dimoqraadiyadda iyo axdiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Carruurta, sinnaan iyo in dadka oo dhan ay isku mid yihiin.



Dugsiga xannaanada furan

Xarunta qoyska ee "Samovaren" waa goob ay ku kulmaan waalidiinta carruurta leh 0-6 sano.

Cinwaanka laga helo waa: Svenhögsvägen 6, isla dhismaha xarunta caafimaadka ee Arlov. Waxaad u imaan kartaa halkan si aad ugu oggolaato ilmahaaga inuu la ciyaaro carruurta kale, oo aad la hadasho waalidiinta kale ee carruurta yaryar leh. Waa lacag la'aan loo ma baahna diiwaangelin hore.

www.burlov.se/samovaren

Facebook:

facebook.com/familjecentralenSamovaren/

Dugsiga barbaarinta guud

Laga bilaabo xilliga dayrta, cunuggu saddex jirsado, wuxuu xaq u leeyahay dugsiga xannaanada guud oo ah 525 saacadood sannadkii-ba, taas oo u dhiganta 15 saacadood usbuucii. Dugsiga barbaarinta guud waa lacag la'aan.

Xulo oo codso dugsiga barbaarinta

Codsiga waxaa sameeya waalidka afar bilood ka hor inta uusan bilaabin si uu boos u helo. Waxaa codsiga lagu dalbadaa habka elektaroonikada ah:

www.burlov.se/ansokforskola

